



Adiga Naafo oo Shaqeynaya: Sidee Ayaan Kuu Caawin Karnaa

Miiska ku jira

Maheshaa gunoyinka dadka naafada ah? Waxaan kaacaawin karnaa inaad shaqayso 2

Shuruucda adeegga naafada ee Social Security

Fiirinta faaiidooyinka Social Security ee shaqada 2

Sidee ayay qarashaadka kusoogala usaamaynayaan gunooyinkaaga Social Security 3

Maxay tahay inaad soosheegto hadaad shaqayso aadna hesho gunooyinka Social Security ee naafada 3

Hadaad shaqada waydo 4

Shuruuc ugaar ah shaqaalaha indhoolayaasha ah 4

Shuruucda barnaamijka Supplemental Security Income (SSI)

SSI fiirinta faaiidooyinka shaqada 4

Plan to achieve self-support (PASS) 5

Haddii yoolkaaga shaqo uuyahay inaad ganacsi furato 6

Sidee ayay qarashaadka kusoo gala usaamaynayaa gunooyinka lagaasiyo SSI 7

Maxaad soosheegaysaa hadaad shaqo haysato aadna sidoo kale qaadata gunooyinka SSI 8

Illaa mudo intee le'eg ayaa lagu siiwadayaa adeegga Medicaid ee caafimaadkaaga 8

La Xiriirka Lambarka Bulshada 9

Maheshaa gunoyinka dadka naafada ah? Waxaan kaacaawin karnaa inaad shaqayso

Hadaad heshid gunooyinka dadka naafada ah, war wanaagsan ayaan kuuhaynaa. barnaamijyada Social Security's ee dhiirigalinta shaqada iyo Ticket to Work ayaa kucaawinaaya hadaad doonayso inaad shaqo hesho.

Shuruuc gaar ah ayaa usahlaysa dadka qaata gunooyinka Social Security ee lasiiyo dadka naafada ah ama Supplemental Security Income (SSI) si ay ushaqaystaan ayagoo wali qaadanaaya gunooyinkooda.

Sidoo kale, hadaad siwadi karin inaad shaqayso sababo laxariira xaalad caafimaad, gunooyinkaaga ayaa lagu bilaabi karaa markale — uma baahnid inaad codsi cusub dirsato.

Faaiidooyinka shaqada waxaa kamid ah:

- Gunooyinka kaashka ah oo laguusii wadaayo mudo adoo shaqaysanaaya;
- Waxaa laguusii wadayaa adeegga Medicare ama Medicaid adoo shaqaysanaaya; sidoo kale
- Waxaa lagaa caawinayaa waxbarashada, tababaro, iyo baxnaanin si aad ubilowdo shaqo cusub.

Social Security iyo SSI waxay leeyihiin shuruuc kaladuwan. Waxaan shuruucda kusharxaynaa barnaamij kasta buugaan dhexdiisa. Faaiidooyinka Social Security waxay kabilaabanayaan bogga 2, halka faaiidooyinka SSI looga hadlaayo laga bilaabo bogga 4.

Hadaad hesho adeegga Social Security ama SSI, noosheeg isla marka aad shaqo biloowdo ama aad shaqada joojiso, ama hadii isbadal kale noocuu rababa ha ahaadee uu kugu dhaco kaasoo saamayn kuleh gunooyinkaaga.

Barnaamijka Ticket to Work ayaa sidoo kale kucaawin kara hadaad rabto inaad shaqayso. Waxaad heli kartaa:

- Dalxiis baxnaanin ah oo lacag la'aan ah;
- Tababar;

- Shaqooyin laguusoo qabanaayo; iyo
- Taageero kale oo dhanka shaqada laxariirta.

Ma maridoontid dib u eegis dhanka caafimaadkaaga ah markaad qaadanaayo “ticket” lacag la'aanta ah aadna dadaalka ugu jirto sidaad shaqada ugu laaban lahayd.

Markaad diyaar utahay inaad hubiso dookhyada shaqadaada, Waxaad sidoo kale booqan kartaa webseetka Ticket to Work oo ah www.choosework.ssa.gov si aad macluumaad dheeri ah uhesho, waxaan leenahay Laynka caawinta tooska ah ee Ticket to Work kaasoo kuusuuragalinaaya inaad nagalahadasho shaqada, gunoyinka, ama barnaamijyada yada faaiidooyinka shaqada. Wac **1-866-YOURTICKET (1-866-968-7842)**, Isniinta illaa Jamcada inta udhaxaysa 8 a.m. iyo 8 p.m. EST. Hadaad dhago la'dahay ama dhago culustahay, waxaad wici kartaa nambarka TTY oo ah, **1-866-833-2967**. Ama waxaad wici kartaa nambarka macmiilka ee bilaash ah aadna waydiin kartaa adeegaaga *Ticket to Work* (Nambarka Daabacaada. 05-10061) sidoo kale waxaa laga heli karaa www.socialsecurity.gov/pubs.

Fiirinta faaiidooyinka Social Security ee shaqada

(Shuruucda barnaamijka SSI waxay kabilaabanayaan bogga 4.)

Trial work period — Adeegga trial work period wuxuu kuusahlayaa inaad tijaabiso awooda aad uleedahay inaad shaqayso ugu yaraan sagaal bilood. Inta lagu jiro mudadaada trial work period, waxaad helaysaa gunoyinkaaga Social Security oo dhamaystiran ayadoon lafiirinayn lacagta aad qaadato marba hadaad soosheegtay inaad shaqayso, walina aad naafo tahay. Sanadkii 2018, adeegga trial work month waa bilkasta oo qarashka kusogalo kabato \$850. Hadaad shaqo adigu aad leedahay haysato, waxaad haystaa adeegga a trial work month markaad hesho qarash kabadan \$850 (marka laga jaro qarashaadka kugu baxa) ama aad kashaqayso goobtaada shaqo wax kabadan

80 saacadood. Adeegga trial work period wuu siisoconayaa ilaa aad shaqayso sagaal bilood mudo 60-bilood ah gudahood.

Extended period of eligibility — Kadib adeeggaaga trial work period, waxaad haysataa 36 bilood oo aad shaqayn karto isla markaasna aad qaadanayso gunooyinkaaga bilkasta oo qarashaadka kusoo gala aysan “kugu filnayn.” Sanadkii 2018, waxaan u aqoonsanay qarashaadka gaaraaya \$1,180 (\$1,970 hadaad indhoole tahay) inuu noqonaayo mid kugu filan. Looma baahna codsi cusub ama go’aan laxariira naafanimadaada si aad uhesho gunada naafada ee Social Security inta mudadaan lagu jiro.

Expedited reinstatement — Hadii gunooyinka lagaa joojiyo sababo laxariira inaad hesho qarash kugu filan, waxaad haysataa mudo shan sano ah oo aad nooga codsankarto inaad gunooyinkaaga dib kuugu biloowno hadaad awoodin inaad siishaqayso xaaladada naafonimo awgeed. Uma baahnid inaad codsi cusub gudbiso ama aad sugto in gunooyinkaaga dib loobilaabo intaan xaaladaada caafimaad qiimaynayno.

Siwadida adeegga Medicare — Hadii adeegaaga Social Security ee gunooyinka dadka naafada ahloojoojiyo sababo laxariira qarashaadka aad hesho, adeegaaga bilaashka ah ee Medicare Qaybta A wuu kuusiisoconayaa ugu yaraan 93 bilood kadib shanta bilood ee xiliga qiimaynta shaqada. Intaas kadib, waxaad gadan kartaa adeegga Medicare Qaybta A adoo dhiibaaya lacag joogto ah bishii. Hadaad haysato adeegga Medicare Qaybta B, waa inaad siiwadaa bixinta lacagta joogtada ah. Hadaad doonayso inaad joojiso adeegaaga Qaybta B, waa inaad qoraal ahaan kucodsataa.

Qarashaadka shaqada ee laxariira naafonimadaada — Hadaad shaqayso, waxaa laga yaabaa inaad bixiso qarashaadka alaabaha qaarkood ama adeegyada kuwaasoo aysan bixin dadka aan naafada ahayn. Tusaale, Sababo laxariira xaaladaada caafimaad, waxaad ubaahantahay inaad taksi kiraysato si aad shaqada ugu tagto halkii aad karaaci lahayd gaadiidka dadwaynaha; ama

waxaa laga yaabaa inaad bixiso qarashka adeegyada talosiinta. Waxaad awoodaa inaad qarashaadkaan kagoyso lacagta aad bishii hesho kahor inta anaad go’aamin inaad wali xaq uleedahay gunoyinka.

Sidee ayay qarashaadka kusoogala usaamaynayaan gunooyinkaaga Social Security

Intada lagu jiro mudada trial work period, majiraan cadad ugo’an qarashaadka aad hesho ee laqiimaynaayo. Inta lagu jiro mudada dheeraadka ah ee 36 bilood extended period of eligibility, caadiyan waa inaad samayn qarash kabadan \$1,180 bishiiba hadii kale gunooyinka waa lagaa joojinayaa. Laakiin, waxaan qarashaadka uga jaraynaa lacagta aad kahesho shaqada sababo laxariira naafonimadaada markaan xisaabino qarashaadka kusoogala. Haday jiraan qarashaad dheeri ah oo shaqa kaaga baxa, qarashka kusoogala waa inuu kabadnaado \$1,180 kahor intaysan saamayn kuyeelan gunooyinkaaga. Qarashaadkaan iskufilnaanshuhu caadiyan way kordhaan sanadkasta.

Qarashaadka shaqada kaaga baxa waxaa kujira waxkasta oo aad ubaahantahay si aad shaqdaada ugudato, xataa haday muhiim uyihiin nololshaada caadiga ah. Tusaalayaasha waxaa kamid ah qarashaadka daawooyinka laguu qoro, adeegyada talosiinta, gaadiidka kugeeya kaana sooqaada goobta shaqada (xaalada gaar ah markay jiraan), tababarahaaga shaqsiga ah ama shaqada, ama qalab kasta oo gaar u ah shaqada.

Maxay tahay inaad soosheegto hadaad shaqayso aadna hesho gunooyinka Social Security ee naafada

Hadaad hesho adeegga Social Security sababo laxariira naafonimadaada, adiga ama wakiilkaagu waa inuu islamarkaba noosheegaa:

- Hadaad shaqo biloowdo ama joojiso;

- Aad soosheegtay inaad shaqayso, laakiin waajibkaaga shaqo, saacadaha shaqada, ee mushaarka lagusiiyo ay isbadalaan; ama
- Aad bilowday inaad bixiso qarashaadka shaqada sababo laxariira naafonimadaada.

Waxaad soosheegi kartaa isbadala kudhaca shaqadaada adoo nasoo wacaaya, boosto noosoodiraaya, ama shaqsi ahaan noo imaanaaya. Waxaad kaheli kartaa xafiiskeena deegaanka webseetkeena oo ah www.socialsecurity.gov. Waxaan kusiinaynaa risiid cadaynaaya inaan helnay warbixintaada. Meel fiican dhigo risiidkaan si lamid ah dhamaan waraaqaha kale ee kaasoo gaara adeegga Social Security.

Hadaad shaqada waydo

Haddii shaqo la'aan kugu dhado inta lagu jiro mudada trial work period, gunooyinkaaga wax saamayn ah kuma dhacayaan. Hadaad shaqada lumiso inta lagu jiro mudada 36 bilood ah ee extended period of eligibility, nasoo wac markaas waxaan dib kuugu bilaabaynaa gunooyinkaanka maadaama aad wali naafo tahay.

Shuruuc ugaar ah shaqaalaha indhoolayaasha ah

Hadaad tahay qof indho la'aan, aadna shaqayso adoo helaaya gunooyinkaaga Social Security, waxaa jira shuruuc gaar ah:

- Waxaad heli kartaa qarash dhan \$1,970 bishiiba sanadka 2018 kahor inta aan qarashaadka kusoogala saamayn kuyeelan gunooyinkaaga.
- Hadaad hesho qarash aad uga badan cadadka aad kuheli karo gunooyinka naafada, waxaad wali xaq uleedahay “joojinta” naafonimadaada. Tani macnaheedu waa inaanaan xisaabinayn sanadihii aad qarashka yar helaysay ama aadanba waxba helin sababo laxariira naafonimadaada oo lahubinaayo gunooyinkaaga mustaqbalka.

Tani faaiido ayay kuutahay waayo waxaan kusalaynaa gunoyinkaaga qarashaadka ugu badan ee kasoogala shaqadaada. Waxii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan shuruucda ugaarka ah dadka indhoolayaasha ah, ka akhri *If You Are Blind or Have Low Vision — How We Can Help (Hadaad indho la'dahay ama Aragaagu Liito — Sida Aan kuucaawin Karno)* (Daabacaada Nambarkedu yahay. 05-10052). (Oo kaliya kuqoran afka Ingiriisiga)

SSI firinta faaiidoyinka shaqada

(Shuruucda Social Security ee adeegyada naafada waxay kuqoranyihiin bogga 2.)

Siiwadida adeegga SSI — Waxaan siinaa gunooyinka SSI dadka da'doodu tahay 65, indhoolayaasha ah, ama naafada ah, kuwaasoo haysta qarash aad uyar ama adeegyo liita. Hadaad naafo tahay aadna shaqayso adoon fiirinayn naafonimadaada, waxaad siiwadi kartaa inaad hesho gunooyinka inaa qarashaadka kusoogala, marka lagu daro qarash kasta oo kusoogala, ee kabata xadka loodajiyaya qarashaadka SSI. Xadadkaan way kaladuwan yihiin gobal kasta. Xataa haddii qarashaadkaaga SSI lajoojiyo, adeegaaga Medicaid waa laguusii wadayaa ilaa iyo inta qarashaadka kusoogala ay kahooseeyaan xadka gobalka udagsan.

Expedited reinstatement — Hadaan kaajoojino gunooyinkaaga sababo laxariira inaad qarashaad kugu filan hesho, aadna hadhoow joojiso shaqadaada sababo caafimaad awgood, waxaad naga codsan kartaa inaad dib kuugu bilowno gunooyinkaaga. Umabaahnid inaad gudbiso codsi cusub oo naafonimo hadaad codsigaan gudbiso mudo shan sano ah gudahood laga bilaabo bishii lajoojiyay gunooyinkaaga.

Qarashaadka shaqada ee laxariira naafonimadaada — Hadaad shaqayso, waxaa laga yaabaa inaad bixiso qarashaadka alaabaha qaarkood ama adeegyada kuwaasoo aysan bixin dadka aan naafada ahayn. Tusaale, Sababo laxariira xaaladaada caafimaad, waxaad ubaahantahay inaad taksi kiraysato si aad shaqada ugu tagto halkii aad karaaci

lahayd gaadiidka dadwaynaha; ama waxaa laga yaabaa inaad ubaahato bixinta qarashka adeegyada talasiinta. Waxaad awoodaa inaad qarashaadkaan kagoysa lacagta aad bishii hesho kahor inta anaad go'aamin inaad wali xaq uleedahay gunoyinka.

Ardayda naafada ah — Hadaad kayartahay da'da 22, aadna aado iskuul, ama aad sijooqto ah udhigato barnaamij tababar ah, maxisaabinayno qaar kamid ah qarashaadka kusoo gala. Sanadkii 2018, maanaan xisaabinayn qarashaadka ilaa laga gaaro \$1,820 oo ah qarashka kusoogala bishii (ugu badnaan waxay ahayd xadka loodajiyaya \$7,350 sanadkii 2018) markaan xisaabinayno gunooyinkaaga SSI.

Marka xigga, waxaan ugu talagalnay qayb dhan oo lagu sharxaayo muhiimada uu leeyahay adeegga SSI ee faaiidoyinka shaqada, the plan to achieve self-support, ama barnaamijka PASS.

Plan to achieve self-support (PASS)

Qorshaha adeegga plan to achieve self-support waa in lagaa caawiyo helitaanka alaabta, adeegyada, ama xirfadaha aad ugu baahantahay inaad gaarto yoolalkaaga shaqada. Yoolkaaga shaqada waa inuu yareeyaa kutiirsanaantaada aad kutiirsantahay gunooyinka SSI ama wuxuu kaacaawinayaa inaad kabaxdo adeegga Social Security ee naafada ama gunooyinka SSI. Shaqo kasta oo aad u adeegsato inaad kugaarto hadafkaaga shaqo lama xisaabinaayo marka lahubinaayo sida qarashaadka iyo adeegyada aad hesho usaamaynayaan gunooyinkaaga. Tusaale, waxaad lacag uqoondayn kartaa inaad iskuul kudhigato si shaqo laguugu tababaro ama aad ganacsi ubilowdo. Waxaad sidoo kale lacagta u adeegsan kartaa inaad ukaydsato:

- Gaadiidka kaasoo qaadaaya kuna gaynaaya goobta shaqada;
- Lacaga tuushanka, buugaagta, qarashaadka iskuulka, iyo adeegyada aad ugu baahantahay iskuulka ama tababarka;
- Daryeelka cunuga;
- Daryeelka xaadirinta;

- Adeegyada shaqada, sida macalinka shaqada kutusaaya iyo qorista waraaqdaada xirfadaha;
- Qalabka caawimaada ee casriga ah oo aad u adeegsanayso hawlaha laxariira shaqada;
- Adeegyada aad ubaahantahay si aad ganacsi ufurato;
- Qalabka iyo farsamooyinka aad ugu baahantahay si aad shaqada usamayso; ama
- Yunifoomyada, dharka qaaska ah, iyo qalabka badbaadada.

Sida loodajiyaya qorshe — qorshuhu waa inuu ahaadaa mid qoraal ah, barnaamijka Social Security waa inuu ansixiyaa. Si aad ubilowdo, laxariir xafiiska deegaanka ee adeegga Amaanka Bulshada (Foomka SSA-545-BK). Kadibna, raac tilmaamaha hoose si aad udajiso qorshahaaga:

1. Go'aanso waxa uunoqonaayo yoolkaaga shaqada. Tusaale, yoolka shaqadaadu waxay noqonkartaa inaad hesho shaqada aad doonaysid, aadna aaminsantahay inaad shaqadaas qaban karto, markaad dhamayso qorshahaaga. Waxaan kuugayn karnaa lataliye dhanka baxnaaninta ah oo kutababara kaasoo kaacaawinaaya inaad fahanto yoolkaaga shaqo. Qolyaha kale ee sadexaad ayaa kucaawin kara, sidoo kale. Waxaad sidoo kale dajin kartaa qorshe aad kudaboolayso qarashaadka adeegyadaada tababarada (ayna kujiraan imtaxaanka, adeegyada tababarka, iyo qorshaynta ganacsiga).
2. Sheeg dhamaan talaaboyinka aad ubaahantahay inaad qaado si aad ugaarto yoolkaaga iyo mudada aad ubaahantaha inaad kudhamayso talaabo kasta.
3. Go'aanso adeegyada ama alaabta aad ubaahantahay si aad ugaarto yoolkaaga. Qorshahaagu waa inuu qeexaa sida qalab ama adeeg uu kaaga caawinaayo inaad kuguulaysato yoolkaaga. Tusaale, hadaad rabto inaad kashaqayso maqaayad, waa inaad barataa sida wax lookariyo. Hadaad doonayso inaad noqoto khabiir dhanka

barnaamijyada kumbuyuutarka lagu sameeyo, waxaad ubaahantahay shahaado kuleej. Hadaad rabto inaad furato ganacsi aad adigu leedahay, waxaad ubaahantahay inaad soogadato qalabkii loobaahnaa.

4. Xisaabi celceliska qarashaadka aad ugu baahantahay si aad usoogadato alaabta ama adeegyada. Waxaan kaliya aqbalaynaa alaabta qiimahoodu macquulka yahay iyo adeegyada.
5. Xisaabi cadadka lacageed ee aad u baahantahay inaad uqoondaysy bilkasta si aad ubixiso qarashaadka alaabtaan iyo adeegyadaan. Hadaad qarash uqoondaynayso qorshahaaga, gunadaada SSI caadiyan waa lakordhiyaa si lagaaga caawiyo qarashaadka noloshaada kubaxa. Waxaan qiyaasi karnaa intay noqonayso cadadka gunadaada SSI hadaan aqbalno qorshahaaga.
6. Noosheeg sida aad qarashaadka qorshahagaaga kubaxaaya kuga saaraysid lacag kasta oo kale oo aad haysato. Sida ugu wanaagsan oo aad sidaan kusamayn karto waa inaad furtaa akoonti bangi oo ugaar ah lacagta aad uqoondaysy qorshahaaga.
7. Kajawaab DHAMAAN suaalaha kuqoran foomka SSA-545-BK, saxiix, kadibna kuqor taarikhda. Hubi in ciwaanka gurigaaga iyo nambarka taleefankaaga oo sax ah inay kuqoranyihiin foomka.
8. Gee ama boosto ugudir foomka aad buuxisay xafiiska deegaanka ee adeegga Social Security.

Hadaad ubaahantahay in laga caawiyo qorista qorshahaaga, xafiiska deegaankaaga ee adeegga Social Security ayaa ma kucaawinaaya ama kugu hagaajinaaya urur maxali ah oo kucaawin doona.

Haddii yoolkaaga shaqo uuyahay inaad ganacsi furato

Kudar qorshahaaga ganacsiga furashada sharaxan ee codsigaga hadaad markaas doonayso inaad bilowdo ganacsi kuu gaar ah. Qorshahaaga ganacsiga waa inuu sharxaa:

- Nooca shaqo ee aad rabto inaad bilowdo (tusaale, maqaayad, dukaan daabacada qaabilsan);
- Goobta aad ganacsiga kafuranaysid (tusaale, dukaan kiro ah, meel banaan oo dadka kadhaxaysa);
- Saacadaha aad shaqada kujiraysid;
- Nooca macaamishaada, dadka adeegyada kuukeenaaya iyo dadka tartanka kugula jiraaya;
- Sida aad usuuqgayn rabto alaabahaaga;
- Noocyada alaabta iyo adeegyada aad ubaahantahay si aad ganacsiga ubilowdo;
- Intay noqonayso qiimaha adeegyadaan iyo alaabtaan;
- Qaabka aad rabto inaad kubixiso qarashaadka alaabtaan iyo adeegyadaan; iyo
- Qarashaadka aad isleedahay way kaasoogalayaan ganacsiga afarta sano ee ugu horaysa.

FIIRO GAAR AH: Waxaan kugu dhiiri galinaynaa inaad latashato qof kaacaawin kara qorista qorshahaaga ganacsi. Wuxuu noqonkaraa qof katirsan adeegyada Small Business Administration, Adeegyada Saraakiisha Hawl gabka ah, lataliye dhanka tababarka, qof kashaqeeya bangida maxaliga ah, ama qofkasta oo khibrad u leh caawinta dadka raba inay ganacsi furtaan. Waxaad kudari kartaa qarashaad kasta oo caawimaadaan kaaga baxa qorshahaaga.

Social Security waa inay qiimayn kusameeyaan qorshahaaga — kadib markaad gudso codsigaga, qabiir dhanka qorshaha adeegga Social Security ayaa:

- Dib u eegis kusamaynaaya qorshaha si looxaqiijiyo inuu dhamaystiranyahay;
- Go'aaminaaya haddii qorshahaagu kuusahlaayo jaanis wanaagsan oo yoolkaaga aad kugaari karto;
- Go'aaminaaya haddii qarashaadka meesha kuqoran ay yihiin kuwo muhiim u ah inaad hadafkaaga gaarto iyo hadii qiimahoodu yahay mid macquul ah;
- Go'aaminaaya haddii qorshahaagu ubaahanyahay wax isbadlo ah kadibna kaala niqaashaaya; sidoo kale
- Wuxuu khabiirku kuusoo dirayaa waraaq si laguugu sheego inaan aqbalnay ama diidnay qorshahaaga.

Hadaan aqbalno qorshahaaga, khabiirka ayaa kulasoo xariiraaya si joogto si looxaqiijiyo inaad raacayso qorshahaaga aad kugaarayso hadafkaaga. Hubi inaad haysato risiidyada lacag bixinta ee alaabta iyo adeegyada aad soogadatay.

Hadaan diidno qorshahaaga, waxaad kaqaadan kartaa racfaan — Hadaanaan aqbalin qorshahaaga, waxaad xaq uleedahay inaad racfaan kaqaadato go'aanka. Waraaqda aad hesho ayaa sharaxaysa xaq aad uleedahay racfaan inaad qaadato iyo kuuna sheegaysa sida aad racfaan kugudbin karto. Waa inaad sidoo kale noosoo gudbisaa qorshe cusub.

Hadaan aqbalno qorshahaaga, waxaad samayn kartaa isbadalo — Hadaad hadhow go'aansato inaad wax kabadasho qorshahaaga, waad samayn kartaa sidaas. Hase yeeshee, waa inaad ogolaansho kaheshaa Social Security kahor intaadan samayn wax isbadalo ah. Qoraal ahaan noogu sheeg isbadalada aad rabto inaad samayso, sida isbadal aad kusamaynayso cadadka lacageed ee aad uqoondaysay bilkasta ama isbadalo kadhacaaya qarashaadka kugu baxaaya. Khabiirka ayaa dib u eegis kusamaynaaya isbadalada kuuna sheegaaya hadaan aqbalno. Noosheeg sida ugu dhakhsaha badan isbadalada saamaynta kuleh qorshahaaga.

Noosheeg hadaadan buuxin karin qorshahaaga — Laxariir xafiiskaaga adeegga Social Security hadaad go'aansato inaad joojiso qorshahaaga. Khabiirka qorshaha ayaa kaacaawin kara sidaad isbadalo ugu smayn lahayd qorshahaaga si aad hadafkaaga ugaarto. Ama, waxaad soogudbin kartaa qorshe cusub oo yool cusub leh.

Hadaadan buuxin qorshahaaga, waxaan bilaabaynaa xisaabin qarashka ama adeegyada aad uqoondaysay qorshahaaga markaan hubino gunooyinkaaga adeegga SSI ee bilaha ah. Tan macnaheedu waa in qarashka lagaa siiyo SSI layaraynaayo ama laba joojinaayo Hadaad sugto mudo dheer si aad noogu sheegto inaad jojisay dajinta qorshahaaga, waxaad heli kartaa cadad badan oo ah gunada SSI. Kadibna, waa inaad bixisaa qarashaadka lagaa siiyay SSI maadaama aad joojisay dajinta qorshahaaga. Xasuusnoow, waxaad sidoo kale dooran kartaa inaad qorto qorshe cusub oo leh yool cusub.

Sidee ayay qarashaadka kusoo gala usaamaynayaa gunooyinka lagaasiiyo SSI

Waxaan kusalaynaa gunooyinkaaga SSI cadadka qarashaadka kale ee kuso gala. Marka qarashaadkaaga kale bataan, gunooyinkaaga SSI caadiyan hoos ayay udhacayaan. Sidaas awgeed markaad hesho qarash kabadan xadka SSI loogu talagalay, gunooyinka lagusiiyo waa lagaa joojinayaa bilahaas. Laakiin, qarashaadkaaga dib ayaa laguugu bilaabayaa si toos ah bilkasta oo qarashaadkaagu kahoos maraan xadka loogu talagalay bixinta gunada SSI. Noosheeg haddii qarashaadkaagu hoos udhaceen, ama aad shaqada joojisay.

Haddii qarashka kusoo gala uu yahay kaliya gunooyinka SSI, iyo qarashaadka kaasoo gala shaqadaada, maxisaabinayno \$85 ee ugu horaysa qarashaadkaaga bishiiba. Bilkasta, waxaan yaraynaa gunooyinka lagaa siiyo barnaamijka SSI qarash dhan 50 senti halkii doolar ee kasta oo kusoogala kana sareeya cadadka \$85.

Tusaale: Markaad shaqayso aadna hesho \$1,000 bishii; qarashka kusoo galana uu yahay Kaliya mushaarkaaga iyo gunadaada SSI.

\$1,000

-\$85

\$915 oo looqaybshay 2 = \$457.50

Waxaan kajaraynaa \$457.50 lacagtaada SSI.

Waxaad xaq uyeelan kartaa qorshe aad ugu guulaysan karto inaad adigu istaageerto kaasoo kuusahlaaya inaad lacagta iyo adeegyada u isticmaasho yool shaqo oo gaar ah.

Qarashaadkaan lama xisaabinaayo marka hubinayno sida qarashaadka kusoo gala hada iyo adeegyada aad hesho usaamaynayaan gunooyinka lagusiiyo.

Maxaad soosheegaysaa hadaad shaqo haysato aadna sidoo kale qaadata gunooyinka SSI

Hadaad qaadata gunooyinka SSI, waa inaad noosheegtaa islamarkaba:

- Hadaad shaqo biloowdo ama joojiso;
- Waajibaadkaaga, saacadaha aad shaqaynaysid, isbadalka kudhaca mushaarkaaga; ama
- Aad bilowday inaad bixiso qarashaadka shaqada sababo laxariira naafonimadaada.

Waa inaad soosheegtaa qarashaadkaaga bishii adoo:

- Nagasoo wacaaya taleefanka lacag la'aanta ah oo ah **1-800-772-1213** ama nambarka TTY, **1-800-325-0778**, hadaad dhag la'dahay ama dhago culustahay, maalinta 6aad ee bisha xigta; ama
- Adoo boosto ugu diraaya ama keenaaya cadaymaha mushaarkaaga xafiiska Social Security ee deegaankaaga maalinta 10 aad ee bisha soosocota.

Waxaad kaheli kartaa xafiiskeena deegaanka webseetkeena oo ah www.socialsecurity.gov. Waxaan kusiinaynaa risiid cadaynaaya inaan

helnay warbixintaada. Meel fiican dhigo risiidkaan si lamid ah dhamaan waraaqaha kale ee kaasoo gaara adeegga Social Security.

Inta badan dadka leh taleefanada waxay soosheegi karaan mushaarkooda ayagoo isticmaalaaya systemkeena soowargalinta mushaarka ee casriga ah. Inaad mushaarkaaga macluumaadkiisa kusoo gudbiso taleefanka waxay kaafududaynaysaa waraaqo dirista, boosto aadista, iyo waqtiga aad kubixinayso, waayo uma baahnid inaad koobiyayso waraaqaha, fax kudirto, ama aad boosto kudirto cadaynta mushaarkaaga ee aad ugudbinayso xafiiska deegaanka. Laxariir barmaaniijka Social Security si loogu diwaangaliyo.

Wixii macluumaad dheeri ah oo laxariira soogudbinta mushaarkaaga, waxaad ka akhrin kartaa buugga *Reporting Wages When You Receive Supplemental Security Income (SSI) (Soosheegista Mushaarkaaga Markaad qaadata Qarashaad Caawimaad ah (SSI))* (Nambarkiisa daabacaaduna yahay. 05-10503). (Oo kaliya kuqoran afka Ingiriisiga)

Illaa mudo intee le'eg ayaa lagu siiwadayaa adeegga Medicaid ee caafimaadkaaga

Si guud, adeegaaga Medicaid waa laguusii wadayaa xataa marka qarashaadka SSI lagaa joojiyo, illaa mushaarkaagu gaaro heer loocayimay. Heerkaas lacayimay way kaladuwanyihiin gobaladu waxayna kuxirantahay qiimaha daryeelka caafimaadka ee goblakaaga. Waan kuusheegi karnaa heerka adeegga Medicaid ee gobalkaaga. Haddii qarashaadka daryeelkaaga caafimaadku kabadanyihiin heerkaan, Hase yeeshee, aad heli karto qarashaad dheeri ah aadna ilaalsan karto adeegaaga Medicaid. Inta badan gobalada, si laguusii wado adeegga Medicaid, waa inaad:

- Baahi uqabtaa inaad shaqayso;
- Aadan awoodin inaad iskabixiso qarashaadka caafimaad ee lamidka ah adoon lagusiin gunooyinka SSI;

- Aad wali tahay naafo; iyo
- Inaad buuxiso shuruudaha kale ee uqalmida adeegga SSI.

Hadaad xaq uyeelato adeegga Medicaid ayadoo laraacaayo shuruucdaan, si joogto ah ayaan dib u eegis ugu samaynaynaa kiiskaaga si aan uhubino hadaad wali naafo tahay ama indho la'dahay aadna wali qaadato mushaar kayar lacagta xadka u ah gobalkaaga.

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my Social Security* xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement (Warbixinta Lambarka Bulshada)*, ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;

- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow

Social Security Administration
Publication No. 05-10095-SO | March 2018
Adiga Naafo oo Shaqeynaya: Sidee Ayaan Kuu Caawin Karnaa
Working While Disabled: How We Can Help (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha